



**FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA**  
**Ministry of information Culture And Tourism**

Date: 03/05/2020

**WAR SAXAAFADEED**

Muqdisho, 3-da May, 2020- Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska waxay hambalyo ku aadan maalinta Saxaafadda Aduunka ee 3-da May u diraysaa dhamaan Weriyayaassha, Xarumaha saxaafadda iyo Ururada ay ku mideysan yihiin Suxufiyiinta Soomaaliya.

Sida ay dhigayaan Dastuurka KMG ah ee Dalka, Dhamaan Shuruucda dalka iyo Siyaasadda iyo Mabaadiida ay ku dhisan tahay, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa ka go'an ilaalinta madax banaanida iyo xorriyadda Saxaafadda, Xoriyatul qowlka iyo in Soomaaliya yeelato Warbaahin Madax Banaan oo si xornimo iyo nabad gelyo ku jirto uga hawlgasha Soomaaliya oo dhan.

Ku dhowaad 30 sano oo Soomaaliya ku soo jirtay qaabab kala duwan oo deganaan la'aan iyo dagaalo lagula jiro xoogag nabad diid ah, ka dib, Dawladda Soomaaliya waxaa ogtahay in dalku in uu yeesho Warbaahin madaxbanaan ay dani ugu jirto dalka iyo dadka Soomaaliyeed, iyo in dhismaha Dowladda iyo Bulshada si degdeg ah uga soo kabtaan dhibaatooyinka ay u geysteen degaan la'aanta iyo aragaxisadu.

Waxaanu ka xunahay oo uga Tacsiiyedaynaynaa Suxufiyiinta Soomaaliyeed tacadiyada, dilalka iyo hanjabaada ay kooxaha Argagaxisada ah ee Alshabaab ku hayaan Suxufiyiinta Soomaaliyeed iyo in ay si xor ah oo nabadelyo ah u guntaan shaqadood. Dowladda Soomaaliya waxay burburisay Shabakado Argagixiso oo u xilsaarnaa dilka iyo Cabudhinta Warbaahinta Soomaaliyeed, sidoo kale waxay gacanta ku dhigtay Gacan ku dhiiglayaal Argagixiso ah oo Sharciga la horgeeyey.

Dhinaca Shuruucda iyo in la helo qaab-dhismeed ay ku wada shaqeeyaan Dowladda iyo Suxufiyiinta Soomaaliyeed waxaa dhowaan labada aqal ee Barlamaanka Soomaaliyeed meel mariyeen Sharciga Saxaafadda Soomaaliyeed, kaasoo damaanad qaadaya xoriyada Saxaafadda iyo suxufiga iyo ilaalinta Nabadgelyadood, sidoo kale dhisaya guddi Qaran oo ay ku mideysan yihiin Dawladda, Suxufiyiinta Soomaaliyeed iyo Hay'adaha arimaha Bulshada iyo Xuquuqul Insaanka kaasoo wax badan ka taraya korjoogteynta ku dhaqanka Sharciga.

Waxaanu mar labaad u hambalyeynaynaa Suxufiyiinta Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan, waxaanuna ku dhiirigelinaynaa in ay shaqadooda u gutaan si xor ah oo ay ku jirto Masuuliyad.



DHAMMAAD